**UNITED NATIONS ASSISTANCE MISSION IN SOMALIA**
**(UNSOM)**
**MABAADII'DA QARAMADA MIDOOBAY: DAACADNIMO, XILKASNIMO, IXTIRAAMKA KALA DUWANANSHAHA DADKA**
**BOOSKAN WAXAA UU U FURAN YAHAY OO KELIYA DADKA U DHASHAY SOOMAALIYA MANA LAHAN FAA'IIDOOYINKA LA MID AH KUWA CAALAMIGA AH**
**HAWEENKA SI GAAR AH AYAA LOOGU BOORRINAYAA IN AY CODSADAAN**

**TAARIIKHDA KAMA DAMBEYSTA AH:** **4 OKTOOBAR 2018**
**TAARIIKHDA SOO SAARISTA:** **5 SEBTEEMBAR 2018**
**MAGACA jEGADA:** **MAS'UULKA XUQUUQDA AADANAHA**
**HEERKA:** **NO-D**
**QAYBTA:** **QAYBTA XUQUUQDA AADANAHA IYO ILAALINTA**
**GOOBTA:** **MUQDISHO**
**MUDDADA HESHIISKA:** **HAL (01) SANO OO GO'AN**
**LAMBARKA OGEYSIISKA BOOSKA BANNAAN:** **UNSOM/HRPG / 036/2018/SM**

**Ogeysiis Khaas ah**
Booskan waxaa la maalgelinayaa muddo hal sano oo hordhac ah kaliya, muddo kordhintana waxaa ay ku xirnaan doontaa sida loo ansixiyo miisaaniyadda. Booskan waa mid maxalli ah. Codsadaha ayaa mas'uul ka ah dhammaan kharashka ka bixi doono si uu ula wareego booskan. Dhammaan codsadayaasha waxaa si weyn loogu boorrinayaa in ay codsiyadooda ku soo gudbiyaan hab online ah (internet) sida ugu dhaqsiyaha badan kaddib markii la xayeysiiyo shaqadan iyo ka hor inta aan la gaarin taariikhda kama dambeysta ah ee ku cad xayeysiinta.

Dadka daneynaya in ay codsadaan shaqadan kuwaas oo haatan la shaqeeyo qandaraasleyda UN waa in ay fuliyaan waajibaadyada heshiiska ay la galeen qandaraasleyda UN si ay u noqdaan dad u qalma in ay codsadaan booskan bannaan.

**Qaabeynta hay'adda iyo Kala-sarreynta:**

Booskan waxaa uu ka bannaan yahay Hawlgalka Kaalmeynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOM) Muqdisho. Xil-hayaha waxaa saldhig u noqon doonaa Muqdisho waxaana uu hoos imaan doonaa Mas'uulka Sare ee Xuquuqda Aadanaha ama Madaxa Qaybta Xuquuqda Aadanaha.

**Mas'uuliyadaha:**
Mas'uulka Xuquuqda Aadanaha waxaa uu mas'uul ka noqon doonaa waajibaadyada soo socda:

1. In uu qaabeeyo uuna hoggaamiyo barnaamijyada karti-dhiska uuna taageero farsamo ah oo ku aaddan hirgelinta ballan-qaadyada xuquuqda aadanaha siiyo guddiga ka kooban wasaaradaha kala duwan oo ay ku jiraan Wasaaradda Difaaca iyo Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya, Wsaaradda Amniga Gudaha, Wasaaradda Caddaaladda, Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqda Aadanaha, iyo sidoo kale guddiyada baarlamanka ee ay khuseyso (Xuquuqda Aadanaha iyo Amniga);
2. In uu dejiyo xeeladaha uuna kala kaashado hay'adaha dowladda si loo horumariyo u hoggaansanaanta Siyaasadda ku Dhaqanka Xuquuqda Aadanaha (HRDDP) iyada oo loo marayo taageero ku wajahan qiimeynta halista, la socodka, falanqeyn iyo warbixin ku saabsan hirgelinta, oo ay ka mid tahay iyada oo loo eegayo xadgudubyada galmada ee la xiriira colaadda iyo carruurta ku sugan goobaha ay ka socdaan colaadaha hubeysan.

3. In uu ku taageerro hay'adaha qaranka isku dubaridka iyo qiimeynta hawlaha la xiriira hirgelinta iyo dabagalka talooyinka ay soo bandhigeen Guddiyada Heshiisyada ee QM, Habraacyada Gaarka ah iyo nidaamyada kale ee Golaha Xuquuqda Aadanaha ee QM.
4. In uu qaabeeyo, isku dubarido isla markana hirgeliyo dadaallada karti-dhiska lala sameynayo la-hawlgalayaasha caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ah, oo ay ka mid yihiin kuwa taakuleynayo dhismaha hay'adaha dowladda iyo dib-u-habeynta hay'adaha, si loo waafajiyo xeerarka xuquuqda aadanaha ee caalamiga ah isla markana ay u oofiyaan ballan-qaadyada shuruucda caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha.
5. In uu qaabeeyo, bixiyo, isku dubarido isla markaana qiimeyn ku sameeyo barnaamijyada tababarka xuquuqda aadanaha ee loogu talogalay mas'uuliyiinta qaran, wakiilladda bulshada rayidka, hay'adaha aan dowliga ahayn ee u qaabilsan xuquuqda aadanaha, Hay'adaha Dowliga ah ee Xuquuqda Aadanaha iyo la-hawlgalayaasha kale ee qaranka.
6. In uu gacan ka geysto dejinta xeeladaha ol'olaha, in uu ol'oleeyo uuna kala taliyo hay'adaha munaasabka ah oo ay ka mid yihiin mas'uuliyiinta dowladda, Kooxda QM ee Dalka (UNCT) iyo Kooxda Gargaarka Bani'aaddamnimada ee Dalka (HCT), iyo madaxda sare ee Xafiiska Guddoomiyaha u qaabilsan Xuquuqda Aadanaha (OHCHR) istaratiijiyadaha sida ugu wanaagsan lagu ilaalin karo laguna horumarin karo xuquuqdaha aadanaha iyo nidaamyada lagu joojiyo ciqaab la'aanta iyo xalka xadgudubyada xuquuqda aadanaha.
7. In uu sameeyo uuna joogteeyo xiriir lala yeesho hay'adaha qaranka, bulshada rayidka, hay'adaha QM, Sanduuqyada, iyo Barnaamijyada u xilsaaran taakulayn, iyo bah-wadaagta kale ee habboon si loogu wargeliyo xaaladda xuquuqda aadanaha ee goobta hawlgalka, isla markaana uu bixiyo talo ku saabsan arrimaha la xiriira xeeladaha iyo siyaasadaha si loogu dhowro laguna horumariyo xuquuqda aadanaha.
8. In uu gacan ka geysto dadaallada Ilaalinta Dadka Rayidka (PoC) ee dhinaca qiimeynta, calaamadeynta iyo ka warbixinta halista, digniinta hore si looga hortago waxna laga qabto xadgudubyada ay geystaan ciidamada ammaanka, iyo in uu sare u qaado awoodda ay dowlad goboleedyada u leeyihiin horumarinta isla xisaabtankooda iyo ilaalinta.
9. In uu guddoomiyo iyo/ama uu ka qayb qaato kooxaha maxalliga ah ee munaasabka ah, uuna ka qaybgalo wadahadalka lala yeelanayo kooxaha kale si loo xaqiijiyo ka mid yeelidda xuquuqda aadanaha.
10. In uu qabto waajibaadyada kale ee loo xilsaaro.

**Kartida:**

**Xilkasnimo:** In uu ku faano shaqadiisa iyo guulaha; in uu muujiyo xilkasnimo iyo in uu aqoon buuxda u leeyahay shaqada; In uu yahay qof feejigan oo ku wanaagsan ka soo bixidda ballanqaadyada, in uu dhowro muddada kama dambeysta ah uuna ku guuleysto natiijooyinka; halkii uu dhiiriggelin ka heli lahaa arrimo shaksiyeed oo asaga u khaas ah in uu dhiiriggelin ka helo arrimo ku saabsan shaqo; in uu dhabar-adeyg muujiyo markii uu la kulmo dhibaatooyin ama caqabado; In uu noqdo qof deggan markii ay asiibto xaalado walaac ku abuura; in uu isa saaro mas'uuliyad in uu tixgeliyo arrimaha jinsiga uuna xaqiijiyo sinnaanta dhinaca ka qayb-galinta dumarka iyo ragga ee dhammaan shaqooyinka.

**Wada-Shaqayn:** In uu si wadajir ah ula shaqeeyo shaqaalaha kale si loo gaaro yoolka hay'adda; In uu afkaarta uruuriyo asaga oo si dhab ah u qiimeynayo fikradaha iyo khibradaha dadka kale; in uu yahay qof diyaar u ah in uu dadka kale wax ka barto; In uu danaha kooxda uu ka horumariyo danaha shakhsi; In uu taageero uuna ku dhaqmo si waafaqsan go'aanka kama dambeyska ah ee kooxda, xata haddii go'aannadaas aysan is waafaqsaneyn go'aankiisa; in uu amaanta guulaha la gaaray uu la qaybsado kooxda uuna aqbalo in uu qayb mas'uul ka yahay dhammaan gaabiisyada kooxda.

**Qorsheynta iyo Qaabeynta:** In uu diyaariyo yoolal cad kuwaas oo waafaqsan xeeladaha la isku afgartay; in uu garto howlaha iyo shaqooyinka mudnaanta la siinayo; in uu wax ka beddelo howlaha mudnaanta la siiyay sida loo baahdo; in uu wakhti iyo agab ku habboon ku bixiyo dhammeystirka

shaqada; in uu saadaalin karo halista uuna u diyaargaroobo xaaladaha degdegga ah markii uu sameynayo qorshaha; In uu la socdo uuna wax ka beddelo qorshaha iyo tallaabooyinka sida loo baahan yahay; in uu wakhtiga u adeegsado si hufan.

**Xukmid/Go'aan gaarid:** In uu garto arrimaha ugu muhiimsan markii lagu jiro xaalado adag, iyo in uu si degdeg ah u galo arrinta ugu muhiimsan; In uu uruuriyo xogta muhiimka ah ka hor inta uu go'aan gaarin; In uu tixgeliyo saameynta togan iyo kuwa xun ee go'aanka ka hor inta uu gaarin; In uu go'aannada gaaro isaga oo tixgelinayo saameynta ay ku yeelanayaan dadka kale iyo Hay'adda; In uu soo jeediyo tallaabooyinka la qaadi lahaa ama uu bixiyo talooyin ku saleysan dhammaan macluumaadka la haayo; In uu isku barbardhigo malaha iyo dhabta; In uu xaqiijiyo in tallaabooyinka la soo jeediyay ay dabooli doonaan baahiyada loo qabo go'aanka; In uu go'aamo adag la yimaado haddii loo baahdo.

**Aqoonta:**

**Waxbarasho:** Shahaado sare ee jaamacadda (Master-ka ama wax u dhigma) oo dhinaca Sayniska Siyaasadda, Maareynta ama Horumarinta, ama wax la mid ah. Shahaado heerka koowaad oo ay wehliso labo sano oo khibrad wax ku ool ah waa loo aqbali karaa booska shahaaddada sare. Tababar xirfadeed ee dhinaca qorshaynta, la-socodka iyo qiimeynta, fududeynta iyo/ama isku duwidda waa muhiim.

**Khibrad:** Ugu yaraan afar sano oo khibrad wax ku ool ah oo dhinaca xuquuqda aadanaha ama wax la xiriira, kuwaas oo ugu yaraan hal sano oo ka mid ah lagu bixiyay dhinaca xuquuqda aadanaha ayaa loo baahan yahay. Ugu yaraan hal sano oo khibrad ah ee dhinaca nidaamyada caadiga ee hawlgalka goobta ee QM (oo ay ku jiraan nabad-ilaalin, hawlgallada siyaasadeed iyo hay'adaha QM, sanduuqyada iyo barnaamijyada) ama hay'ad calami ah ama hay'ad aan dowli ahayn oo la mid ah oo ka hawlgala meelaha ay ka socdaan colaado ama ka soo kabsanaya colaad ayaa loo baahan karaa. Khibrad la xiriira la socodka iyo ka soo warbixinta arrimaha xuquuqda aadanaha ayaa loo baahan yahay. Khibrad ku aaddan u ol'oleynta xuquuqda aadanaha iyo/ama ku aaddan qaabeynta iyo maareynta barnaamijyada karti-dhiska iyo/ama qabashada baaritaannadda xuquuqda aadanaha ayaa loo baahan yahay.

**Luuqad:** Luuqadaha Ingiriiska iyo Faransiiska ayaa ah luuqadaha shaqada ee Qaramada Midoobay. Aqoon wanaagsan ee dhinaca luuqadaha Ingiriiska ama Faraansiiska (hadal iyo qoraalba) ayaa loo baahan yahay. Aqoonta luuqadaha kale ee Qaramada Midoobay waa mid habboon.

**Habka Qiimeynta:** Qiimaynta dadka u qalma booskan ayaa waxaa ka mid noqon karaa layli qiimeyn ah kaas oo ay daba socon doonto warreysi la xiriira kartida.

**Macluumaad Dheeraad ah**:
Dadka codsiga soo gudbiyay oo aan la soo qaadan balse xilliga uu socday imtixaanka ku soo baxay in ay u qalmaan shaqo la mid ah waxaa lagu hayn karaa diiwaanka muddo toddoba sano. Dadka diiwaanka la geliyay tixgelin ayaa la siin doonaa markii ay mustaqbalka soo baxaan isla shaqadan iyo heerkan shaqo.

**Sida loo gudbiyo codsiga:**
Dadka u qalma shaqadan waxaa ay ku soo gudbin karaan codsiyadooda oo ay qayb ka tahay foomka Taariikhda Shakhsiyeed ee Qaramada Midoobay (P.11) cinwaanka hoose markii la joogo ama ka hor taariikhda kama dambeysta ah. P11 waxaa aad ka heli kartaa **https://unsos.unmissions.org/jobs.** Codsiyada la soo gudbiyo kaddib wakhtiga kama dambeysta ah ee ah **04 Oktoobar 2018-ka** lama aqbali doono. **Warqadaha taarikh nololeedka dadka (CVs) lama aqbali doono**.

**Email: recruitment-unsoa@un.org**

**Fadlan Lambarka Ogeysiiska Shaqada Bannaan iyo Jegada Shaqada ka dhig mowduuca email-ka.**

**Fadlan ku lifaaq nuqulka foomka P.11, Shahaaddada Jaamacadda/ama Shahaado, Baasaboor iyo/ama Teesaraha Aqoonsiga. Fadlan ogow in Shahaadooyinka Waaxda Dembi Baarista (CID-da) iyo Hay'adda Sirdoonka iyo Nabad-sugidda (NISA) loo baahan doono qaybaha dambe ee hannaanka shaqaaleynta.**

Qaramada Midoobay marnaba ma xaddideyso xaq u yeelashada dhinaca ka qaybgalka ee ragga iyo dumarka maadaama ay mabaaddii'deedu iyo tan hay'adaha la xiriira xusayaan sinnaan jinsi.

**QARAMADA MIDOOBAY MARNABA MA QAADATO WAX LACAG AH INTA LAGU GUDO JIRO HANNAANKA SHAQAALEYNTA (CODSIGA, KULAN WAREYSIGA, DIYAARINTA AMA TABABARKA)**